Refugee Rights Turkey

Mülteci Hakları Merkezi

# Habka Magan Gelyada Calaamiga ah ee Turkey

# XUQUUQAAHA IYO WAAJIBAADKA

## SU'ALLO IYO JAWAABO

**XUQUUQDA QAXOOTIGA EE TURKIGA: LA TALINTA XAGA SHARCIGA IYO KAALMADA QAXOOTIG OO LACAG LA,AAN AH**

Türkiye'de Uluslararası Koruma Pprosedürü

**HAKLAR VE YÜKÜMLÜLÜKLER**

**SOMALİCE**

SORULAR & YANITLAR

**Şubat 2016 Güncellemesi**

# Waxaan ka soo Qaxay wadankayga waxaanan imid turkiga, Xaq ma u leeyahay inaan jooga halkan?

Dadka laga soo barakiciyeye wadamad hooyo sabab dagaal awgood, persecution. Sidas daraade aan ku laaban Karin waxay xaq u leeyihin ina waydistan magangelyo wadanka turkiga. Hadaba si ay hesho magangelyada turkiga, waa inaad u tagtaa Hayda, la dhoho DGMM. Oo u taagan Hayad guud maamulka hijoodayaash . Waa hayda dawli ah oo lagu aaminay inay mangelyo siiso qaxootiga. Waa inaad codsi u qorataa. SHuruucdida turkiga . waxa loogu yeedha 'Codsiga Mangangelyad caalamiga ah'. Waa xuquuq iyo Nidam lagu siiyo dadka magangelaya doonka ah ee turkiga waxaan la mari doona sharciga ajaanibta ee magangelya doonka caalmaiga ah, qodobkis yahay(6458).

Hay,ada DGMM waa hay,ad qiimayn doonta, ka dib go,aan ka gaadhi doonta codsigaga. Hadi hay,ada DGMM ay soo ogaato inaada dalkagii ku laaban Karin sababo dagaal dartood iyo dhibaatoyin kale ama tacadiyo kale ee xuquuqul insaanka ka baxsan. Codsigaga waa la ogolaan doona waxaana lagu siin doona Magan gelyo Caalami ah taas oo dawlad turkigigu ku siin doonto.

Hadii aad codsato magan gelyo doon caalami ah, Waxaa laguu ogolan doona inaad Turkigaa sii joogtid ila iyo inta Hayada, DGMM ay go,aan ka gaadhayso. Waxaad kalo ka faaidaysan karta xuquuqdada asaasiga ah sida aafimaadka, waxbarashada. Hadii go,aankagu noqodo Aqbal oo lagu ogolaado, waxaad xaq u leeedahay sii joogi taanka turkigaga waxaaad heli doonta xuquuq la mid ah xuquuqda dadka turkiga jooga.

Sharciga turkigu ma ogolaa in dadka qaxootiga ah Mudo dheer sii joogaan ama ay helaan sharciyada muwaadinka. Taas wax loo yiri Madama aad ku guulaystay inad lagu aqoonsado magan gelya doon calaami ah oo lagu ogolaaday oo hayada DGMM ku siisay. Hadi xitaa aad heli wadan sadeexaad oo ku ogolaada inad mudo dheer ku nolaato. Waxaa lagu ogol yahay inad turkiga sii joogtid kumeel gaadh oo aad ku joogto sumada magan gelya doonka ah.

# Maxay tahay shuruudaha aniga xaq ahaan inaan I ogolanaya in aad dawlad turkiga ka dalbado magan gelya?

Marka la tixraaco Sharciga Turkiga, Hadii aadan ku laaban Karin Dalkagi sababi cabsi darted ah.

• In lagu eryoonayo, Isirkaga, Diintad ,Fikir siyaasadeed, Jinsiyadada ama aad ka tirsan tahay uruur bulsheed.

• Xaqiirad lagugu hayo, dagaalo sokeeya iyo mid calaami ah oo ka dhasha ciidamo hubaysan.

• Ama dil lagugu xukumo, ciqaab ama jidh dil bina adamnimad ka baxsan

Waxaad xaq u leedahay inad joogto turkigaga adigi wataa sumada magan gelya doonka caalamiga ah ee dawlad turkigu astaysay.

Hadii aad soo codsato codsiga magan gelya doonka, Hay,ada DGMM waxay ku siinaysa fursad aad ugu fasirto/ qeexdo sababaha aad uga soo tagtay dalkaagi, ama aadan ugu noqon Karin. DGMM waxay qadan doona oo tixgelin doonan dhaman xogta guud ee dalkaga ama dalkag ku sugan yahay iyo dhibaatooyinka ay la kulmi karaan dadka adiga aad isku mid tihin ama aad isu soo dhow dihin, waxayna ku go,aan qadan doonaan in xaladad shaqsiyadeed ay la mid noqoto sadexdi qodob ee kor ku soo sheegnay.

# Qofka ka yimada suuriya ma codsan karan, magan gelya doonka caalamiga ah?

Dadka ku soo qaxay turkiga ee ka yimadan suuriya sababaha dagaalka ka socoda awgiis ama dagaalka u dhexeeya ciidanka hubaysan ee wadankaas, waxay maryaan hab magan gelyo oo ka duwan kan oo lagu yeedho 'Magan gelyo ku meel gaadh ah' iyadoo la tix raacayo heshiskan dadka ka yimaada suuriya waxa lo ogol yahay inay si sharci ah ku joogan turkiga, oo ay helan xuquuqda iyo adeegyo. Xaqootiga suuriyanka wax loga baahan yahay inay u tagaan DGMM oo ay iska diiwan geliyaansi ay uga faaidaystan heshiskan/ Nidamkan. Marka iska diiwan geliyan DGMM ka dib, waxaa lo soo saaraya Aqoonsi Kumeel gaadh ah.

Sida Caadiga ah, dadka Suuriyanka ah, ama dadka bil wadanka ah ee Suuriya iyo Falastiyinta kuwaas hore u deganaa Suuriyaa aya maraya nidaamkan halkas si sharci ah u deganaan karan turkiga ayna helaan xuquuqdad iyo adeegyada si nidaaam kumeel gaadh ah. Dawlad Turkigu uma tixgelin doonto muhiimna uma aragto inay codsiyo dheerad samaystaan. Sida magan gelya doonka caalamiga ah. Sidaas daraadeed dadka ka yimaad suuriya lama siin doona kala doowarsho inay codsadaan codsigaga magangelya donka calaamiga ah.

Taas waxaa lo yiidhi, dadka turkigaga soo gala oo si toos ah aan uga iman suuriya ama wadamo kale oo ay hore uga soo qaxeeen looma ogolaan doono inay helaan magan gelyada kumeel gaadhka ah. Hadaba dadkaas waxay xaq u leeyihin inay dalbadaan Magan gelyada caalamiga ah ee turkigaga. Hadiise ay ka baqayaan in la wax yeeleeyo ama ama lagu dhibaatoyo wadanka ka soo geleen turikga, ama hadii ay ka baqyaaan in dib loogu masaafuriyo suuriyaa, haday wadankaasku noqodaan.

## Xagee baan tegayaa oo iska diwan gelinay codsigayga Magan gelya doonka caalamiga ah? Mase jira waqti xadidan?

Si aad isu diiwan geliso codsigaaga magan gelya doonka caalamiga ah ee turkiga waxaad si toos ah u abaari karta ama ugu tegi karta Hayda PDMM faracyadeed gobolada magalo kasta oo turkiga ka joogtid. PDMM waxay metesha hayada DGMM oo joogta gobol kasta oo turkiga ah.Ma jiro waqti xadidan o sharci ah oo aad ku gudibisan karto codsigag. Hadaba si kasta ha noqotee dadka raba inay ka codsadan magan gelyo dalka turkigaga waxaa waxan kula talinaynaa inay u tagaan Hayda, DGMM oo u bilaabi doonta codsiyadooda magan gelyada calaamiga ah sida ugu dhakhsaha badan iyadoo aan wax dib u dhaca ku ridayn imaanshoda turkiga ka dib.

Sida caadiga ah, Marka laga reebo suuriyanka magan gelya doonka ee ka yimid suuriyaa- dadka doonaya inay magan gelya doonka ahee turkiga, marka hore waa inay yimaad caasimad Ankara si ay isaga diiwan geliyaan Hay, ada Qaxotiga adunka ee lo yaqaan UNHCR. Ka hore inta aysan u iman Hay, ada dawlad ee DGMMsi ay ugu bilowdo codsiyadooda magan gelya doonka caalamiga ah ee dawlad turkigaga. Warbixinada iyo talloyinka ku saabsan ujeedooyinka is diiwan gelinta Hayada, qaxootiga UNHCR, Fadlan tix raac buugan qaybihisa.

Mudada lagu guda jiro is diiwan gelinta Hayada qaxootiga UNHCR, Hayad qaxootigu iyada sheegaysa magalad aad turkiga ka tegi doonti si aad uga bilowdo codsigaga magan gelya doonka ee dawlad turkiga ku siin doonto. Waxaa waajib kugu ah inad soo sheegto magalad mudo 15 casho gudohood ah si aad ugu gaadho xafiiska PDMM ee halkas ku yaal. Xafiska Goboleedka hayada maamulka iyo maaraynta hijroodayaash ee lo yaqaan PDMM aya masuul ka ah diiwan gelintada iyo poroceeskaga codsigaga magan gelyo doonka.

# Maxay tahay faa'idoyinka aan u samanaya codsigan magan gelya doonka ah?

Hadii aad dalkagii uga soo tagtay sababo dagaal awgood, in dil lagu geeysto ama jidh dil oo aad ka baqayso inad dib ugu laabato, waxad samaysa codsi magan gelya doon. Hayada dawlada ee lo yaqaan DGMM waxay ku suurta gelinaysa inaad joogtid turkiga si sharci ah. Magan gelya doon waxaad ka bad baadi doonta in dib lagugu masaafuriyo dalkaagi ama dal kale oo naftad khatar gelin kara.

Magan gelya done ahaan, Waxaad kalo ka faaidaysaaa in aad hesho xuquuq, sida caafimaad, waxbarasho iyo shaqo. Fadlan la tasho hay,ada Xuquuquda Qaxootiga ee Turkigaga ee lo Yaqaan, RRT buugagteda dhaman warbixinada adeegyada caafimadka, Waxbarashada iyo xuquuqada shaqe ee qofka magan gelya doonka ah calamiga ah ee turkiga.

Waxaa intaas dheer, Hadii codsigag guulaysto, Hayada, dawlad ee DGMM waxay ku siinaysa ogolaansho Magan gelya doonka caalamiga ah taas oo ku ogolaanaysa inad ku sii noolato turkigag mudo ila inta aad ka helayso wadan kale oo deganaansho rasmi ah aad ka hesho.

# Hadii aan dalbado magan gelyo doonka caalamiga ah? Meel aan dego ma la i siinayaa? Mase dooran karaa magaladan degayo?

Dadka magan gelya doonka turkiga lama siiyo wax cawimad degaanka xaga guryaha ah, gudaha ahaan sida caadiga ah, dadka magan gelya doonka ah iyaga ayaa laga rabaa inay raadsadan mesha ka degi lahay magalad lagu qoray, qiimaha guryaha ay degayaan waa dushooda iyaga iska bixinayaa.

Khasatan, dadka iyagu u nugul oo taagta daran wax laga yaaba in ay helaan adeeg guryaha lacag la, aan ah mid ka mid goobaha iyo meelaha dadka magan gelya donka ah la siiyo kuwaas ku yaala, magaloyinka kala ah Yozgat iyo Ezurum. Intaas waxaa dheer caruurta da, doo yarta oo cid la socon oo magan gelya raadiska ka ah turkigaga wax lo qorsheeyay goob xarmumo dawlada oo ay u samayso Wasaarad Arimaha qoyayska ee dawlad turkigag.

Dadka codsada magan gelya doonka caalamiga ah turkiga xaq uma laha inay doortaan magalad ay degayaan, Hay, ada dawlad ee DGMM ay u qorshayn doonta una sheegi doonta magalad ay tegi doonaan ila iyo kama danbaysta qorshahaga magan gelya doonka ee turkigaga.ka dib marka turkigaga timaado, hadii marka ugu horaysa u tagto Hayada qaxootiga UNHCR ka hore intaad u tegin hayada dawlad ee DGMM, Hayada qaxootiga ayaa kugula talinaysa inaad tagto magalad ay ku qorshasaya hayada DGMM. Hadiise aad u tagto marka hore Hayadaa dawlad ee Gobolada PGMM ka dibmarka ka timaado Hayada qaxootiga, PDMM Waaxda gobolka ee hayada dawlad ee hijoodayaasha ee lo yaqaan PDMM ayaa ku tusaysa meshad ka degayso magalada iyada war gelinaysa magalad si aad u si wado magan gelya doonkaga caalmaiga ah, ila iyo inta u ka dhamanay habka magan gelya doonkaga.

Sidoo kale, Hadii ay jirto magalo gaar ah oo xiisanayso, ama ay famaligagu degan yihin, waxaad u sheegi kartaa Xafiiska PGMM ama hayada qaxootiga marka lagu diiwan gelinayo, waa laga yaaba inay ku tix geliyaan balse wax la hubo ma ah.

Aaad bay muhiiim u tahay inad is ogaysiiso gobolkaga mudo dhan 15 casho gudohood am hadii aad joogtid gobolki lagugu qoray kama safri kartid adiga ogolaansho ka haysa gobolkaga laanta PGMM. Hadiise aad ka safarto adiga ogolaasho haysan, waxa laga yaaba in lagala noqodo codsigaga magan gelya doonka caalamiga ah, Waxaadna khatar ugu jirta in lagu masaafuriyo.

Xafiiska PGMM ee gobolkaga lagugu qoray waxay ka rabaan inad week ama ka badan inaad is ogaysiiso si ay u hubiyaan joogi tankaga una sii wadaan dukumentiyada.

# Maxaa dhicikara ka dib iyo ka hore codsigayga la xiriira, Xafiska goboleedka maamulka iyo maaraynta Hijroodayaasha ee lo yaqan PGMM?

Marka aad u tagto xarunta, Xarunta dawlad ee gobolada, PGMM oo aaad ka codsato magan gelyo caalamiga ah. PGMM xafiskood waa ay ku diiwan gelinayaa waxayna ka qaadayaan waraysi si ay u helaan warbixintaada ka dib waxay bilaabayaan habka iyo processeskaga codsigaga magan gelya doon. Waxaa laga yaaba in aysan ku suura gelin in isla maalinta lagu diiwan gelin waraysin aan laga qaadin, waxaayna ku xidhan tahay Muga shaqo ee ay xafiskaan hayaan maalintaas.waxaan suuragal ah in balan lagu qabto oo lagu dhoho waqtigaa ayaa isdiiwan gelinta iyo waraysigaba laga qaadayaa.

Mudada lagu guda jiro is diiwan gelinta iyo kulan waraysiga, Madaxda PGMM waxay ku waydiin doonan suaal fuduud ku saabsan aqoonsigaga, sababah aad wadankaga uga soo tagtay, sidoo kale passporkaga aya lagu waydin doona inad tusto hadii ad haysto, ama wax cadayn oo aqoonsigaga oo haysato iyo waxkast ku saabsan sababah aad dalkaag uga soo tagtay. Madaxda PGMM waxay sawir ka qadan doona dukumentiyada, asalka dukemntiyad way ku so celin doonaan. Faro ayeey ka qaadayaan iyo sawir baytomatarikah.haday muhim tahay waxaa suuragal ah inay baadhitan ku sameeya shendedada iyo waxaad ku sidato, sida kale waxa suuragal ah inay ku diiran baadhitan caafimaad. Hadiiba ay kula socodaan famaligagu waxaa suuragal ah inay isku nidam martaan.

Inta lagu gudi jiro waraysigaga, waxa lagu waydin doona suaalo afka ah iyo kuwa qoraal ah kuwas oo ay madaxda xafiska kula yeelan doonan iyad la lagu qimanaayo nidamka codsigaga iyo xuquuqdada iyo shuruucda qofka magan gelya doonka ah.

Iyado la raacayo, isteka kowaad ee is diiwan gelinta waraysigaga, adiga iyo cida kula socotaba oo xubin kast oo qoyskaga ah waxaa la siin doona dukementi kaas log yeedho numberka is diiwan gelinta magan geelya doonka calaamiga ah kaas oo la so raaciyey warbixinta aqoonsigaga taas oo muujinaysa inaad ka codsatay magan gelyo dalka turkiga. Dukumentiga waa lacag la,aan wuxuna shaqayn doona mudo dhan 30 beri. PGMM xafiskeeda gobolkaas ayaa ku kordhin doona mudadad hadii ay muhiim tahay.

Is diiwan gelinta iyo waraysiga ka dib, waxaa lagu sheegayaa taarikhad, Maalinta iyo saacada iyo goobta ee lagugu waraysan doono, taas oo ku siin donta fursad aad ku so bandhigto sababah aad dalkaag uga soo tagtay iyo sababaha aadan ugu noqon kari si faah faahsan.

# Maxaa dhici kara, inta lagu guda jiro kulan waraysigayga?

Kulan waraysigaagu waa fursad aad uga faaidaysan karto si aad u sharaxdo si faah faahsan sababaha aad uga soo tagtay dalkaagi hooyo, iyo sababa aad ugu noqon karin wadankaga. Iyadoo lagu salaynayo warbixinta aad sheegtay kulan waraysigeedka dhexdisa, DGMM waxay go, aan ka gaadhi doonta in xaalaadadu ay buuxiso shuruudaha qawaaninta iyo sharciga degnaansho turkiga ee u yaaal dadka magan gelya doonka calaamiga ah.

Kulan waraysiyeedkaga waxaa qaadi doona, madaxda PDMM ee gobolkaa lagugu qoray, Turjumaan waa lagu keeni doona si u ugu fuduudeeyo kulan warayiyeedkaga hadii aad codsato. Inta kulan waraysiyeedka lagu guda jiro, waxaad haysta fursad aad ku faah faahin karto dhibaatoyinka kala soo kulantay wadankaagi, sababaha aad uga soo tagtay iyo sababaha aadan ugu noqon Karin. Sidoo kale waxaad haysataa fursad aad ku soo bandhigto dukumentiy dheerad ah hadii aad haysato si aad ugu xoojiso codsigaga. Kulan waraysiyeedka shaqsiyadeed waxaa la samayn doona 30 maamlod ka dib maalinta lagu diiwan geliyey. Sida kale waxay qadaan karta mudo intaas ka badan, waxayse ku xidhan tahay shaqad xafiiska hayaaan markaas ee magalada.

Hadii ay kula socodaan xubno qoyskaga ka mid ah, waxay sidoo kale PDMM u samayn doontaa kulan waraysiyeed kala duwan qayb ka mid ama dhamaantoodba si ay oga hesho xog dhamays tiran oo ku sabaabsan sababaha ay dalkood uga soo tageen iyo sababaha aysan ugu noqon karin. Sidoo kale PDMM waxay kaloo idin samayn karta kulan waraysiyeed dheerad ah maalmaha ka dib hadii loo baahdo.

Kulan warysiyeedkagu wuxu ku yahay fursad aad ku soo bandhigi karto dhaman warbixinada iyo dukumentiyadiyaduba kaas oo faah faahinay caawinaya codsigaga. Adiga ayaa door u leh inaad ka ka jawaabtid suaalaha si hufan oo niyad sami ah si ay ugu fuduudato dadka ku waraysanayaa dhamaan warbixinada la xiriira xaaladada ka dibna ay go, aamiyaan inad fulisay shuruudaha deganaansho ee magan gelya doonka calaamiga.

# Waa Maxay Dukumentiga Aqoonsiga Magan gelya doonka Calaamiga ah, Maxaase aan u isticmaali karaa?

Codsadaha Magan gelya doonka Calaamiga ah iyo Qoyskisa la socoda kuwaas dhamay tiray kulan waraysiyoodkood ayaa PGMM u soo saari doonta Dukumantiga Aqoonsiga Magan gelya doonka calaamiga ah. Dukumentiga wuxu leeyahay sawir qofka, gebi ahaanba waa lacag la, aan dukumentigan. Dukumentiga aqoonsiga ee magan gelya doonka calaamiga waxaa u cadayn u yahay inad magan gelya ka codsatay dalka turkiga, codsigaguna yahay mid tagaan una sugayo go, aan ka gaadhistisa ah inad turkigaga u deganaan karto si sharci ah. Dukumentiga wuxu u dhigma ogolaansho deganaansho dadka magan gelya doonka ah. Wuxu ku shaqayn doona mudo 6 bilood ah, waana lagu sii gordhin 6 bilood o kale waxay ku xidhan tahay inta kayskaaga la qiimanayo iyo inta kiiskaagu cosonayo.

Sidaas waxaa loo yidhi, Hadii istayjka is diiwan gelinta ka dib, dawlad go, aamiso in codisagu noqodo mid la diido, am ay go, aansadan ina ay codsiaga u gudbiyaan poroses kale, laguma soo saarayo Kaadhka Aqoonsiga ee magan gelya doonka.Fadlan waxaad eegta qaybta bookan ee ku saabsan dadka codsiyadood la soo diido iyo kuwa dib u eegis lagu sameeyoba.

# Xaq ma u leeyahay inaan tujumaan helo marka aan u tegayo DGMM?

Hadii aadan ku hadli Karin afka turkigaga ama luuqad kale marka u tegayso DGMM ama PDMM, waxaad xaq u leedahay turjumaan marka iska diiwan gelinayo ama kulan waraysiyeedkaga la gaadho, hadii aadan awoodin ama kugu adag tahay inad madaxda la hadasho, waa inaad si deg deg ah ugu codsataa turjumaan. Madaxdu iyaga ku keeni doona turjumaan bila lacag ah.

# DGMM Ma la wadaagti doonta xogtayda cidna, am qof ama hay, adaha kale ama dawalada ama wadankaygi ?

Xogta iyo warbixintaad aad la wadaato DGMM iyo PDMM waa sir waan la ilaali doona, cidna lalama wadaagi doono. Qof sadeexad ama dawlad am dalkaagi midkoodna.xaqiiqdii codsigaga magan gelya doonka ee turkigaa wuxu noqon doona mid sir ah cid kale lama wadaagi doono dawlad iyo dalkaagi midkoodna.

# Goorma ay DGMM go, amin doonta codsigayga?

Hadii codsigaagu ua u maro poroceeska caadiga ah, DGMM dhib uma aragto inay markaba go, aan ka gaadho mudo 6 bilood gudohood ah. Si kasta ha noqot, mudo intaas ka badan way qadan kartaa hadi codsigagu maro marxalada labaad degdega ah, fadlan waxad eegtaa qaybta poroseeska labad ee pageka buukan.

# Maxay ka dhigan tahay inaad go, aan ogolaansho ah aad hesho?

DGMM waxa samanaysa qiimayn faah faahsan si ay go,aan kaga gaadho inad tahay magan geelyo ka doonayso dalka turkiga, shuruuda magan gelya doonka wuxu ku qoran yahay shuruucda iyo qawaaninta dalka turkiga qaybtooda ajaanibta iyo magan gelya doonka calaamiga ah. DGMM waxay go,aamin doonta codsigaga iyad ku salaynaysa shuruuda saxda ee ku qoran sharciga dalka.Hadii go,aanka noqodo mid aqbal ah, meeshad ka timid iyo sababaha aadan ugu nqon kartin dalkaagi, DGMM waxay ku ogolanaysaa sadeexdad shuruudood mid ka mid ah oo ah sumada magan gelyo doonka Caalamiga ah marka loo eego sharciga turkiga.

• Hadii aad ka timid dal yurub ah (Dalaalka xubnaha ka ah Midowga yurub) Hadii ay DGMM ogaato inaad dalkaagi uga timid sabab la xiriira cabsi darted oo Jinsiyadad , diintaada ama uruur siyaasi, ama jinsiyadad ka mid ahaansha Koox ama uruur. Waxaa lagu siinayaa Sumad qaxootinimo.

• Hadii aadan dalkaagi ku noqon kari, sababo la mid ah kuwan kor ku soo sheegnay balse aad ka timid wadamad aan yurub ahayn (wadamad aan xubnaha ka ahayn midowga yurub. Waxaa lagu aqoonsanahay, Qaxooti ku meel gaadh ah.

• Hadii aad koo jedo dal yurub ah ama an yurub ahayn, hadii DGMM ogaato in xooga lagaga so saaray dalkaagi ama aad ka soo carartay oo aadan ku laaban Karin, adiga ka cabsanayaa

o Cabsi aad ka qabti in lagu dhibaateeyo, xaqdarona lagu geeysto mid heer sokeeye ama mid heer calaami ah oo ka dhasha dhulka khilaafka ka tagan yahay.

o Ama aad khatar ugu jirto in dil lagugu xukumo ama jidh dil lagu geeysto ama aad ciqaab mutaysato, waxa lagu aqoonsanayaa Qaxooti Hoosaad.

# Maxaan magan gelyada calaamiga ah ee Turkigaga xaq ugu leeyahay?

Hadiiba iyo marka lagu ogolaado sadeexad qodob een kor ku soo sheegnay ee magan gelya doonka calaamiga ah, waxaa lagu ogolanayaa inaad ku sii noolan karto dalkaga Turkigaga si sharci ah adiga oo lagu aqoonsan yahay magan gelya doon, Waxaadna ka faaidaysan karta xuquuqada asaasiga ah

Sharciga Turkigu ma ogola in qaxootigu ay degaaan oo mudo dheer ku sii nooladan am ay helaan jinsiyad muwadnimo ah. Qofka haysta magan geyla doonka ah calaamiga ah ma ah inu welig sii deganaanayo turkigaa marka lo eego sharciga turkigaga. Marka lagu aqoonsado magan gelya doon calaami ah oo DGMM ku siiso, hadii aan waxba iska bedelin dalkaagi ama aadan heli wadan sadeexaad oo deganaansh rasmi ah ku siiyaa, waa lagu sii ogolaan kara inaad xooga sii joogtid turkigaga adiga wataa sumada magan gelya doonka.

Marki la ogolaado codsigaga aad ka samaysay DGMM, PDMM oo ah laanta farac DGMM ee gobolka lagugu qoray waxay ku siin doonan kaadh aqoonsiga magan gelya doonka ah calaamiga aha adiga iy cida kula socota oo qoyskaga ahbaa.. Dukumentiga wuxu cadayn u

yahay magan gelya doon nimada iyo deganaanshahag turkiga. Gebi ahaanba waa lacag la, aan. Ugu horaysti wuxu ku shaqayn doona Mudo sanad ah dadka qaxootiga kumeel gaadhka ah, iyo kuwa xaqooti hoosadka ah, waana loo sii kordhin kara sanad kale.

# Haddii aan ku guulaysto codsigayga, Ma heli kara dhalaashada Turkiga mustaqbalka?

Sharciga turkigu ma ogola dadka qaxootiga ah inay sii deganaanada, ama ku sii nooladan mudo dheer am ay helaan dhalashada turkigaga. Sidaas daraadeed hadii aad ku guulaysto codsigaga oo lagu siiyo DGMM ku siiso Magan gelya doonka calaamiga iyo wixi la xiriir, sharciga turkigu marnaba ma codsan kartid dalashada wadanka turkigaga, sida hore u sheegnayba hadii aan wadankaga waxba iska bedelin ama aad helin wadan sadeexad oo deganaansho rasmi ah ku siiya, waad ku sii noolan karta dalka turkiga in mudo sifo sharci ah adiga ah magan gelyo doon calaami ah.

Sida hore u sheegnay, hadii aad ka timid wadan yurub ah (wadamad xubnaha ka ah midowga yurub) ama aad qaxooti rasmi ah tahay oo DGMM ku aqoonsatay, waxad la soo xiriir karta Ha,ayada RRT oo ah Xuquuqada Qaxootiga Turkiga si aad uga hesho talo ku saabsan waxyaalaha ogolanayaa dhalashad turkiga.

# Maxaa dhici karaa hadii codsigayga la diido?

Marka baadhitan iyo qiimayn lagu sameeyo codsigaga, Hadii DGMM u aragto in aad buuxin shuruudihi magan gelya doonka ee turkiga, Laanta farac ah ee PDMM ee gobolkaga lagugu qoray ayaa qoraal ahaan kugu soo sheegaysa codsigaga diidmadisa. Hadii aad ku qancin go, aanka diidmada, xaq waxad u leedahay inaad racfaan ka qaadato ama abiil.

Marka hadii aad racfaan ka qaadan ama abiil aad soo qoran mudad lagugu siiyey sida sharciga turkigu dhigayo. Sidan hoos ku qeexi doono, waa go,aan kama danbays ah, ilaa aad sheegto sababo kale oo kaga cudur daranayso sii joogi tankaga turkiga.. DGMM waxay soo saari doonta go,aan lagaga masaafurin laha dalka turkiga. Sidaa daraadeed hadi aad diido go,aanka diidmad ah codsigaga magan gelyo doonka calaamiga ah , waxaa muhim ah aad niyad ku hayso waqtiga xadiidan ee sharciga turkigu dhigayo.

Hadii aad rabto inad racfaan ka qaadato, go,aanka diidmad codsigaga.

• Waa inaad ugu tagta xafiiska PDMM gobolka aad ku qoran tahay mudo dhan 10 casho gudohood oo aad u gudubisa racfaankaga ama ambiilkaga gudiga qiimaynta magan gelya doonka. Gudiga qiimaynta magan gelya doonka ma ah maxkamad, waase gudi madax banana oo ka mid ah DGMM taas dib u eegis ku samaysa go,aamad diidmad ah ee la soo siiyo dadka magan gelya doonka ah, iyo go,aan kast oo qofka magan gelya doonka ah aan ku qanacsanayn. Marka hadii aad racfaan ka qadat gudida qiimaynta magan gelya doonka ah, gudidaadsi waxay racfaankaga ama ambiilkaga ku soo jawaabi doona mudo 15 casho gudeheed ah.

• Hadiise racafaankaga ama ambiilkaga ay diidan gudiidad qiimaysa dadka magan gelyadoonka ah, waxaad sidoo kale ku celin kartaa maxkamada mudo 30 casho gudeheed laga bilaabo maalinta gudidaasi ku soo diiday. Marka hadii aad rabto inaad marinba gudiidisa qiimaysaa dadka magan gelya donka, toos ayaad maxkamad ugu gudbin kartaa go,aankaga diidmad ahaa mudo sodon casho gudohood ah. Ma Jiro waqti u xadidan oo ay go,aankga diidmad kaga soo jawaabi karto maxkamadu, balse waxay qadan karta bilooyin.

• Hadii Maxkamadu hoos soo diido go,aankaga diidmad ah, ugu danbayti waxaad u gudubin karta Maxkamad ugu saraysa ee maamulka dalka turkiga ee loo yaqaan(danistay) dib ugu egisti igu danbaysay.

Hadi codisagu yahay kan deg deg ah,waqtigu waa xadidan yahay habka aad racfaanka uga qaadanaysa wuu ka duuwanan doona midka aan kor ku so sheegnay. Faah faahinta sida aad racfaan uga qaadan lahayd go,aanka diidmad ah eek u saabsan codsiga deg deg ah, waxaad ka eegi karta hoos ee habka deg dega ah.

# Khatar miyan ku suganahay in lay masaafuriyo inta racfaankaga lagu guda jiro?

Sida sharciga turkiga dhigayo, waxaa lagu ogol yahay inad turkiga sii joogta ilaa iyo inta DG|MM go,aan kama danbays gaadhayso. Go,aanka diidmad ee DGMM qadanayso ma noqon dona kama danbays, hadi aad ka faaidaysto inad racfaan ka qadaato waqtiga kor lagugu soo sheegay, sidaa darted khatar uguma jirtid in lagu masaafuriyo ilaa iyo inta go,aan laga gaadhayo codsiga racfaankaga ama ambiilkaga.

Si kastaba ha noqotee, hadii go,aankagu guul daraysto, oo go,aanka DGMM noqod mid kama danbays ah. DGMM waxay gaadhi doonta go,aan gaar ah oo ay kugu masaafurinayso hadii aadan keen sababo aad ku cadaynayso sii joogi taankaga turkiga si sharci ah.

Sidan hore u soo sheegnay, waxad kalo xaq u leedahay inad racfaan ka qadato masaafurintada hadi aad rabto. Hadii xalaadan aad la kulanto. Waxaan kugula talinaynaa inad la tashato Haydaa, RRA oo ah Hayada Xuquuqda Qaxootiga Turkiga ama looyar ama qaareen khaas ah ama hayada aan dawliga ahayn oo bixiyaa adeegyada la xirira sharciga si aad uga hesho warbixino iyo tallooyinka xaga sharciga ah.

Hadii Saraakisha DGMM I ogaysiyaan inaan codsigayga lo ogolaan Karin, Taas maxay la macno tahay

Marka loo eego sharciga turkigaga, DGMM waxa laga yaab ina codsigaga magan gelya doonka calaamiga ah aan la ogolaan Karin, hadii saraakisha DGMM ay cadeeyaan mid ka mid sadeexad qodob ee hoos ku qoran ay kiiskaga is keenaan.

• In aadan turkiga toos ugaga iman dalkaagi aad u dhalatay asal ahaa, balse aad turkiga ka so gashay meshaas oo aad joogti kartti oo aad kaga bad baadi kartid dhibaatad xun xun

• Inaad hore uga codsatay magan gelya doonka calaamiga ah ee Turkigaga, ka dib marka codsigaagina la diiday, racfaankagii u guul daraystay, ka dibn aad codsi labad ku ka dalbatay DGMM adiga oo aan war bixin xogg cusub soo bandhigin ama sababta ay DGMM go,aan kaga gaadhi wayday.

• Ama inad hore u aqbashay in kiiskaagu loo borosees gareyeey isagoo oo qayb ka yahay codsiaga qoyska kugu dhowe ee magan gelya doonka calaamiga ah,, hadii codsigig hore ee xubnaha qoyskaga la soo diiday ama aan weli go,aan laga gaadhin, hadan aad rabto inaad codsi ka gaar ah aad samaysto oo aadan so bandhigin xog cusub ama sababo cadaynayaa in kiiskaagua ka duwan yahay codsigii hore ee qoyskaag qaarkod.

Hadii DGMM cadays that arimahan oo dhami run yihin, codsigaga waa la tix gelinaya mid aan la aqbali Karin. Waana la joojinay in la borses gareeyo. Codsiagana waxaa loo aqoonsan yahay mid an la aqbali Karin. Tani waxay dhici karta is diiwan gelinta ugu horaysay.

Hadii DGMM codsigaga u aragto mid aan la aqbali Karin, sababto ah waxay garwaaqasadeen inaad turkiga ka so gashay dal kale oo aad joogi karaysay nabad ku heli karays shido la,aan. Tan macneheedu waxay tahayinay aaminsan yihininad ku noqon kartid dalkaas aad ka timid oo aad magan gely ku heli kartid, oo aad sidaas darted aadan baahanayn inaad magan gelyo dalka

turkiga ka hesho. Sida caadiga ah, DGMM waxay qaadaysa tallaabooyin sida ay dalkaas kugu celin lahayd, waxaana lagu soo saarayaa deganaansho loogu magic darro.'Ogolaanshiyaha joogitaanka bani'aadamnimada' ina dib u celintaad la diyaarinay oo ay tagan tahay.Si kastaha ha noqoto xaq ma yeelan doontid inaad hesho xuquuqada asaaasiga ahoo ay helaan dadka magan gelya doonka calaamiga ahi.

Hadii wadankaas suaal ka keeno inu dib lagugu cesho, DGMM waxay soo geba gebaynaysa in aysan suurgal ku noqon ku ahayn inaad dalkan magan gelyo doon ka si ahaato, waxayna dib u bilaabaysa faylkaagi oo la borosees garaynaya magan gelya donka calaamiga ah ee turkigaga sida caadiga ahay ama go,aan diidmo ana a mid aqbal ah.

Marka dhinac kale lag eego, hadii codsigaaga la aqbali waayo, sababto ah waxaad ku celisay cod labad ama waxad samaysa codsi ka gaar ah oo keliga ah adiga oo aan soo bandhigin xog cusub iyo sabab toonam,tan macneheed waxay tahay DGMM ma boroosess garayn donaan codsigaga , waxaadse xaq u leedahay inad racfaan ka qadato go,aanka. Hadii aad racfaan ka qaadan go,aankaas mudo 15 caasho, wuxu noqon doona kama danbays. Tan macneheedu waxay tahay inaad ahay codsade magan gela doonka calaamiga ah, arintaas oo kale DGGm waxay ku soo saaray go,aan gaar ah oo masaafurin ah hadi aad la imaanin ama keeni sababo aad ku cadanayso sii joogi tankaaga turkiga si sharci ah.

# Sidee baan racfaan uga qaadan karayaa go,aanka DGMM ee odhanayaa codsigaagi lama ogolaan karo?

Hadii codsigaga loo aqoonsado mid aan la aqbali Karin, waxaa heli wargelin qoraal ah ku saabsan go,aanka. Laga bilaabo taarikhda wargelinta waxaad haystaa mudo 15 maalmod ah oo aad racfaan kaga qaadan kartid go,aankas maxakada ka hore. Maxkamada soo afjaraysa mudo 15 casho ah ugu badnaan , caadiyan maxkamad waxay qadan karta mudo dheer si ay go,aan uga gaadho codsiyada

Codsiga racfaankaga,

- Hadii xukumadu u aragto codsigaga mid aan la aqabali Karin, ama aad codsi labad samaysay ama codsi aad keliga ku tahay oo aadan xog cusub soo bandhign ama aad sheegin iyo sabab run ah. Waxa lagaga baahan yahay inad dhamaan xogaha la xidhiida iyo

dukumentiyada aad ku sharaxdidi asbabaabah aad u buuxin karto shurudaha magan gelya doonka ee turkiga.

• Hadii dawlad soo geba gebayso imaansha aad dalka turkiga timid u yahay mid aad u aragto dal nabad o aad ku bad badi karto, waxa lagaga baahan yahay inaad sharaxdo xaaladad dhabta ah.

Hadii maxkamad go,aansato inay racfaankaga diido, ma jirto sababo kale oo aad racfaan kale u qadan kartid oo dawlad kula gor gortami kartid,, arintan oo kale DGMM go,aanked wuxu noqonay inay u aqoonsadaan codsiaga mid an la aqbali Karin.uuna noqodo mid kama danbays ah. DGMM waxay kaloo qaadays talaaboyin ay dib kugu celinayaa dalka aad marka bad baado u aragto, hadii markaas codsigaagu noqodo mid aan la aqbali Karin, sababto ah waxad soo celisay isla hal codsi oo ki hore la mid ah. DGMM waxay soo soo saari doonta masaafurin.

# Maxaa dhici kara hadii aan ka tago magalada aan ku qoranahay aniga ogolaanshiyo ka haysan xafiska qaabilsan maamulka qaxootiga ee PDMM?

Marka loo eego sharciga Turkiga, kama tegi kartid magalad aad ku qoran tahay adiga ka haysan wax amar ama ogolaanshiyo qoraal ah PDMM, hadiise aad ka tagtid amar la,aan, PDMM waxay u qaadanaysa inaad xiiso badan u qabin magan gelyad caalamiga ah waxay codsigagana waa la tuuri kara oo laga xidhi kara, taas macneed waxay tahay in gebi ahaan la joojin doona sii waditaanka codsigaga. Laguma aqoonsan doono magan gelyo doone calaami ah. Waxaadna mutaysan karta in lagu masaafuriyo.

Hadii marka aad dib ugu noqoto magalad lagu qoray oo aad rabtid inad sii wadatid magan gelyo doonkaga calaamiga ah, is diiwan gelin marlabad waxay tani waxay noqon karta arin adag inta boroseeskaga lagu guda jiro, taas oo aad awoodi u yeelan dooni inad hesho xuququudada iyo adeegyad aan hore u sheegnay ee magan gelya donka heli karo. Sida daraadeed dhibaad ay leedahay ka tegi taanka magalad aad ku qorantahay waa arin khatar ah, sababtan awogeedna, waa inaad ka tegin magalad aad ku qoran tahay adiga ogolaanshiyo haysan.

# DGMM waxa ay cadaysay in codsigagay geb ahaanba waa la tuuray oo la xidhay, racfaan ma ka qaadan karaa?

Hadii aad ka tagto magalad aad ku qoran tahay adigoon wax ogolaanshiyo ah haysan, am aad soo ogaysiin kulan warysigeedka balanta aad la leedahay PDMM mudo sadex jeer ah adiga wax cudur daar ah la iman ama shuruudo kale oo magan gelya doon ah. Xafiska hoose PDMM wuxu soo geba gebaynaynaa inaad xiiso badan u qabin codsigaga magan gelya doonka taasi waxay cadayn u u tahay in gebi ahaanba layska tuuro o. Xaq ayaad u leedahay inad racfaan ka qadato go,aankas tuusi ah. Hadii aad ku guul daraysta inad hore u bilaabi waydo waqtiga xadiida ee lagu siiyeye, waxa laga yaab inaad adiga naftad u keentay go,aanka masaafuriska ah.

Hadaba isk caabinayna go,aanka DGMM ee tourist codsigaga

• Mudo 10 casho ah waa inad xafiska DGMM ugu tagtaa ee magalad aad degan tahay si aad racfaan uga qadatod gudiidad qiimaynta magan gelyad doonka

• Hadii gudidu diido racfaankaga, waxaad racfaan ka qadan karta makaxakmad maamulka mudo dhan 30 casho gudohood ah arinta gudiidad diiday go,aankaga

• Waaad ka dul bood karta gudiida qiimaynta waxaadna sii toos ah ugu tegi karta maxkamad maamulka mudo 30 casho gudohood ah go,aanka ah in la tuuro ama la xidho codsigaga.

• Hadii sidoo kale maxkamad maamulku soo diido racfaankaga, sido kale waxaad u tegi karta kamaxad ugu saraysay turkiga ee lo yaqaan( danistay in Turkish)

Hadii racfaankaga ka dhanka ah tuurista ama xidhista, iyo go,aanka waqtiga xadiidan eek or ku soo faah faahinay, go,aanku ma noqon doono mid kama danbays ah ila iyo inta la dhamays tiray hab racfaanka. Marka lagu masaafurin mayo, si kastaha ha noqotee, hadii aad ku guul daraysttay xiliga loogu tala galay racfaaanka ee saxda ah dhaafto, waxaad khatar ugu jirta in lagu masaafuriyo Turkiga.

Waxaan rabaa inaan bedelo magalad deganahay, taasi suura gal ma tahay

Hadii aad rabto inad ka guurto magalad degan tahay, waxaa laga rabaa inad codsi u gudbisatid xafiska PDMM ee magalad ka dib aad u sharaxdid sababaha iyo waxyaalaha aad u rabtid in

magalada kale lagugu gudibiyo. Go,aanka la xiriir codsiyad dadka magan gelya doonka ee gudbinta waxaa iska leh DGMM.

Codsiyada gudbintta magalooyinka kale wax lagu aqbalaa labo shuruudo taasoo ay DGMM u aragto cudur daar sax ah ee codsiaga gudbinta.

